**DAAWADAADA: Losartan Potassium ____mg**

**Maxaan u qaadanayaa daawadan?** Waxaad leedahay dhiig kar. Dhiig karku waa halis hadii aan la iska daawayn. Wuxuu sababi karaa faalig iyo wadno xanuun. Waad u dhiman kartaa dhiig karka hadii aan lagaa daawayn. Hadii sidoo kale aad leedahay macaan, daawadan waxay kaa ilaalinaysa inaan kalyahaaga wax dhaawac ahi soo gaadhin iyadoo ay sabab u tahay macaankaagu.

**Qaado 1 kiniin ah intaanad waxba cunin aroor kasta.** Waxba ha cunin ka hor inta aanad liqin kiniinka.

**Maxaan dareemi doonaa markaan qaato daawadan?** Mararka qaarkood waxaad dareemi kartaaa saamayn ay kugu keento. Saamayntu waa wax iska caadi ah hadaad dareento. Saamaynta qaar ay jidhkaaga ku keeni karto daawada Losartin hadii aanu jidhkaagu horay ula soo qabsan waxaa kamid ah dawakhaad ama madax xanuun.

Saamaynta qaarkood haday dhacaan waxay noqon karaan kuwo halis ah. **Wac 911 ama aad qolka gargaarka degdega ah isla markiiba haddii aad isku aragto: finan; wajiga, dibnaha, carrabka, ama cunaha oo barara; dhibaato neefsashada ah; ama, aad yeelato dawakhaad daran.**

**Maxaa kale ee aan u baahanahay inaan ogaado?**

1. Waa inaad qaadata daawadan maali kasta xataa hadaad caadi dareemayso.
2. Waa inaad dib u soo qaadataa daawan bil kasta.
3. Hadii aad booqato xafiiska dhakhtar kale, xarun caafimaad, ama qolka gargaarka degdega ah, u sheeg inaad leedahay dhiig kar oo aad qaadato daawada Losartan Potassium.

“Macluumaadka ku jira halkan waxa loogu talo galay kaliya ujeedooyin macluumaad loomana qaadan karo talo khubaro caafimaad ahaan. Markasta weydii talada dhaktarkaaga ama adeeg bixiye daryeel caafimaad oo ku haboon wixii su’aalo aad ka qabtid xaalad caafimaad ama daaweyn.”